



Bundesamt
für Migration
und Flüchtlinge

Koorsooyinka Jihaynta Hore

ee kuwan raadinaya in la ilaaliyo
iyo muhaajiriinta

SOMALI



Integration

Kumaa uqalma inay soo xaadiraan kooraska jihatya hore?

Koorsooyinka hore ee jihatya (Erstorientierungskurs = EOK) waxaa loo nashqadeeyay sidii adeega hor dhaca ah iyo hagitaanka kuwan raadinaya ilaalinta gaar ahaan. Dadka kale sidoo kale way iman karaan haddii boos banaan uu jiro, tusaale ahaan dadka ka faa'iidayanaya ilaalinta ama muhaajiriinta Midowga Yurub.

EOK waxaa loogu talo galay si gooni ah dadka aan awoodin inay yimaadaan kooraska is dhexgalka ama kuwaas oo kooraska is dhexgalku aanay ahayn (weli) doorasho socon karta.

Carruurta iyo kurayda soo xaadirta dugsiga (da'da dugsiga khasabka ah) xaq uma laha inay soo xaadiraan kooraska hore ee jihatya.



Maxaad ku baranaysaa kooraska?

Waxaad baran doontaa xirfadaha luqadda Jarmalka oo kaa caawin doonta inaad jidkaaga hesho. Waxay ka kooban tahay waxay xooga saartaa nolosha maalinlaha ah. Waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan mowduucyada muddada kooraska:

- Nolosha maalin laha gudaha Jarmalka
- Shaqada
- Wax iibsiga
- Caafimaadka / Daryeelka caafimaadka
- Dugsiga barbaarinta / dugsiga
- Isticmaalka saxaafada gudaha Jarmalka
- Jihaynta maxaliga ah / gaadiidka / dhaqaaqa
- Caadooyinka iyo dhaqamada gudaha Jarmalka / caadooyinka gaarka ah ee maxaliga ah
- Sida looga hadlo naftaada iyo dadka kale / xidhiidhada maxaliga ah
- Nolosha guriga
- Qiimayaasha iyo wada jirka



Macalinka EOK waxay dooran doonaan shan ka mid ah mowduucyadan oo muujinaya xiisaha ka qayb galayaasha. Cutubka “Qiyamka iyo Wada jirka” waa waajib. Dhammaan ka qayb galayaasha waxaa looga baahan yahay inay soo xaadiraan. Iyaddoo waxyaabo kale ay ku jiraan, waxaad baran doontaa kuwa uu yahay qiyamka aasaasiga ee qeexa nolosha gudaha Jarmalka iyo sida loogu turjumo goobaha maalin kasta ah.

Tamashlaha waxaa loo habeeyaa ka sakow waxbarida fasalka. Tusaale ah, adiga iyo saaxiibadaada ka qayb galayaasha kooraska waxay booqan karaan masuuliyiinta dowladda, maktabadda iyo suuqa. Tamashlahan sidoo kale waxa uu kaa caawin doonaa adigu inaad hesho jidkaaga iyaddoo loo dhaqan gelinaya waxa aad baratay.

Intee ayuu gaadhayaa koorasku?

Koorasku wax auu ka kooban yahay lix cutub, mid kastaana waa 50 qaybood, ama 300 oo qaybood wadar ahaan. Hal qaybta barida ah waxa uu ku dhammaadaa 45 daqiiqo. Waa jira dhowr qaybood caadi ahaan maalin kasta oo waxbarasho.



Sideed ku soo xaadiraysaa kooraska jihaynhta hore?

Soo xaadirka koorasku khasab maaha oo waana bilaash. Haddii aad xiisaynayso inaad timaado kooraska jihaynta hore, si naxariis leh ula xidhiidh qofka abaabulaya oo miduun isku xidha ama bixiya kooraska gudaha gobolkaaga federaalka ah.

Liiska dhammaan abaabulayaasha iyo macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan koorsooyinka jihaynta, fadlan booqo:




www.bamf.de/eok



<https://bamf-navi.bamf.de>



Wax badan ka baro halkan:



Ogaysiiska sharciga ah

Daabacaha:
Bundesamt für Migration und Flüchtlinge
90461 Nürnberg

Qaabka: 08/2023

Daabacaada: Kern GmbH, Bexbach

Nashqada / shaqada fanka: KonzeptQuartier GmbH, Fürth

Dalabyada:
Publikationsstelle des Bundesamtes für Migration und Flüchtlinge
www.bamf.de/publikationen

Warsidahan waxaa daabacay Xafiiska Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga sidii qayb ka mid ah arrimaheeda bulshadda. Daabacadaada waxaa lagu qaybiyaa bilaash oo looguma talo gelin iib.

Naga soo booqo



www.facebook.com/bamf.socialmedia

[@BAMF_Dialog](https://twitter.com/BAMF_Dialog)

[bamf_bund](https://www.instagram.com/bamf_bund)

Other Language 
www.bamf.de/publikationen

www.bamf.de